# Codsiga Deyn La Cafinayo Oo Aan Dulsaar Laheyn ee Ganacsatada Yaryar

Minneapolis
City of Lakes

Fadlan ogsoonow in dalabka lagu buuxinayo afka Ingiriisiga halkan. Turjumaadan waxa keliya ee loo sameeyay waa tusaale ahaan.

Iyada oo qeyb ka ah dhameystirka maalgelinta ee gurmadka aafada COVID-19, Magaalada Minneapolis waxa ay bixineysaa deyn aan dul saar laheyn oo laga cafinayo ganacsatada yaryar iyo dadka iskood u shaqeysta ee ka soo baxa shuruudaha ku xiran oo dhibaato ka soo gaartay aafada dhacday.

Deyn qaatayaasha ka soo baxa shuruudaha waa in ganacsigoodu qeyb ahaan ka furan yahay magaalada oo ay ka shaqeeyaan 20 shaqaale ama wax kayar dakhligooduna yahay ama ka yar yahay $1 milyan. Deynta la bixinayo waa $5,000 ama $10,000, bixintana waxaa dib loo dhigayaa 12 bilood, iyada oo ugu dambeynta la cafinayo 100% haddii ganacsigu sii joogteeyo inuu ka furnaado Minneapolis isaga oo sharciga u hogaansan.

Codsiyada waxaa la qabanayaa ugu dambeyn ISNIIN, 20 Abriil 2020, 12 :00PM. Codsiyada la soo gudbiyo wixii ka dambeeya xilligaas lama tixgelinayo. Haddii codsiyadu ka bataan lacagta la hayo, deyn codsadayaasha waxaa lagu xulayaa hab bakhtiyaa nasiib ah.

FADLAN OGAADA waa in aad codsiga ku buuxisaan oo aad soo gudbisaan hal fadhi (bilaabaya oo dhameystiraya). Inta aad codiga bilowdo mar dambe ma dhameystiri kartid. Waxaa lagaa doonayaa in aad kombiyuutarka ku soo dirto caddeymaha lagaa doonayo (upload). Waxaanu idinku dhiiri gelineynaa in aad diyaarsataan caddeymaha ka hor inta aadan bilaabin buuxinta codsiga. Fadlan akhri codsiga oo dhan ka hor inta aadan bilaabin

Codsigan waa in la buuxiyaa oo soo gudbiyaa qof awood sharci ah inuu magaca goobta ganacsiga heshiis ku geli karo.

Si laguugu fududeeyo ama aad qoraalkan ku hesho habab kale fadlan la xiriir goobaha hoos ku xusan.

Dadka dhagaha la'a ama maqalku ku adag yahay waxa ay so wici karaan adeegga fara ka hadalka ee 311 ee 612-673-3000. Para asistencia 612-673-2700 - Rau kev pab 612-673-2800 - Hadii aad Caawimaad u baahantahay 612-673-3500.

## HUBINTA SHURUUDAHA KU XIRAN DEYNTA

Codsadaha waa inuu ka soo baxaa dhamaan shuruudaha soo socda laga bilaabo Maarso 1, 2020 si loogu ogolaado deynta. Sharciga uu waddanka ku joogo qofka wax saamayn ah kuma laha shuruudaha ku xiran deynta.

## Goobta Uu Ganacsigu ku yaalo

Goobta ganacsigu ma tahay mid ku taala goobaha deynta looogol yahay?*

Fadlan ka hubi khariidadan:
http://cityoflakes.maps.arcgis.com/apps/InformationLookup/index.html?appid=8d628ae1611e482d8d673b7992fc1b90
Goobaha ganacsiga ama dadka iskood u shaqeysta ee aan laheyn goob ganacsi oo leh cinwaan u gaar ah waxa ay cinwaan ka dhigan karaan gurigooda.

◯ Haa ◯ Maya

**Codsaduhu ma ka soo baxay shuruudaha xajmiga ganacsiga ama dakhliga soo gala? ***

☐ 20 shaqaale ama ka yar markii taariikhdu aheyd march 1, 2020

☐ $1 milyan ama ka yar dakhliga soo galay ganacsiga 2019 (ama dakhligii ugu dambeeyey ee sanadlaha ahaa haddii uu ka duwan yahay)

(Hay'adaha aan faa'iidoonka aheyn ma codsan karaan)

Haa Maya

**Codsaduhu ma u hogaansamay sharciyada Magaalada? ***

Sida ma jiraan wax talaabo ah oo magaaladu ka qaatay ama inuu jabiyey sharciyada magaalada?

Haa Maya

**Ganacsiga uu codsaduhu ku jiro ma yahay gamacsiga khmaraaka, tumashada dadka waaaweyn, ololeeye diiwaan gashan, suuq geyn balaaran,calaamada dacaayadda, ama kireynta goobaha ganacsiga, ama guryaha la dgan yahay?***

Haa Maya

## MACLUUMAADKA CODSADAHA

Magaca: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Magaca Awoowaha: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Iimeylkaaga: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Lambarka Telefoonkaaga : * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

## MACLUUMAADKA GANACSIGA

Magaca Sharciga ah ee Ganacsiga: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Cinwaanka Ganacsiga: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Goobaha ganacsiga ama dadka iskood u shaqeysta ee aan laheyn goob ganacsi oo leh cinwaan u gaar ah waxa ay cinwaan ka dhigan karaan gurigooda

Magaalada: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Gobolka: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Nawaaxiga (ZIP Code:) * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

## MACLUUMAADKA MULKIYADDA IYO GANACSIGA

Fadlan qor magac sadexan, cinwaanka guriga, inta uu % leeyahay qof kasta oo mulkiile ah ah ganacsiga oo eh wax ka badan 20%.

**Magaca Sadexan, Cinwaanka uu Degan Yahay, iyo Mulkiyadda u uku leeyahay % Mulkiilaha 1aad** *

| |
|---|
| |

**Magaca Sadexan, Cinwaanka uu Degan Yahay, iyo Mulkiyadda u uku leeyahay % Mulkiilaha 2aad** *

**Magaca Sadexan, Cinwaanka uu Degan Yahay, iyo Mulkiyadda u uku leeyahay % Mulkiilaha 3aad** *

**Magaca Sadexan, Cinwaanka uu Degan Yahay, iyo Mulkiyadda u uku leeyahay % Mulkiilaha 4aad** *

**Qaab Dhismeedka Sharciga Ah Ee Ganacsiga***

Mid ka dooro (Fadlan mid ka dooro liiska hoos ku xusan)

**Noocyada kale ee Ganacsiga**: * Halkan ku dul qor wixii fariin ah

Haddii aad dooratay mid kale, fadlan faahfaahin ka bixi.

**Nooca ganacsiga ama hawsha aad qabtaan***

Fadlan midda sida sax ah uga tarjumeysa ganacsigaaga, ama dooro kuwa kale oo faahfaahi ganacsigaaga.

☐ Farshaxan/La xiriira farshaxanka
☐ Goob caruurta lagu hayo (Childcare)
☐ Dhismaha (Construction)
☐ Adeegga Qeybinta/gaadiidka/Bakhaarada (Distribution/Logistics/Warehousing)
☐ Madadaalada
☐ Caafimaadka
☐ Farsamada (Manufacturing)
☐ Adeegga dadka (timo jarayaasha, dhar dhaqayaasha, cawska jaraha, iwm)
☐ Adeeg xirfadeed (Professional Services)
☐ Maqaayadaha/Biibitooyinka
☐ Dukaanle (tafaariiqle) (retail)
☐ Kuwo (fadlan faahfaahi): Halkan ku dul qor wixii fariin ah

**Imisa sano ayaad ganacsiga ku jirtay:** *

Mid ka dooro (Fadlan mid ka dooro liiska hoos ku xusan)

**Dakhliga guud (dakhliga) ee 2019***

Mid ka dooro (Fadlan mid ka dooro liiska hoos ku xusan)

**Qiyaasta Dakhliga nooga lumay COVID-19*** Halkan ku dul qor wixii fariin ah

**SHAQAALEYNTA*** – Fadlan ku caddee shaqaalaha ku shaqeeya W-2

| | Ee Maarso 1, 2020 | | Xilligan la joogo |
|---|---|---|---|
| Shaqaalaha shaqeeya xilli dhan (40 saacadood/usbuucii) | | Shaqaalaha shaqeeya xilli dhan (40 saacadood/usbuucii) | |
| Shaqaalaha waqtiga dhiman | | Shaqaalaha waqtiga dhiman | |

**Isticmaalka Deynta (Loan Use) ***

Mid ka dooro (Fadlan mid ka dooro liiska hoos ku xusan)

Haddii aad dooratay "kuwo kale", fadlan halkan ku caddee Halkan ku dul qor wixii fariin ah

HALKAN KAGA DAR QORAALADA AAD RACINEYSO CODSIGAAGA (UPLOAD)

**Qoraalada Aad Raacineyso***

- Qoraalka cadeynaya dakhliga soo galay ganacsiga 2019 (ama warbixintii maaliyadeed ee ugu damebysay haddii ay ka duwan tahay) sida ca canshuur celinta, warbixinta ganacsiga, iyo wixii kale ee cadeynaya dakhliga soo galaganacsiga.
- Qoraalada cadeynaya mushaharka iyo tirada shaqaalaha 1da Maarso 2020.

## DIB UGU NOQOSHADA, DOORASHADA & NIDAAMKA SAXIIXA DEYNTA

Codsiyada waxaa la qabanayaa ugu dambeyn ISNIN, 20 ABRIIL 2020 12 :00 DUHURNIMO.
Shaqaalaha magaalada ayaa eegaya codsiyada iyaga oo raacaya shuruudaha u degsan. Shaqaalaha ayaa go'aan ka gaaraya lacagta deynta ah, $5000 ama $10,000 taasoo ku xiran dhibaatada dhaqaale ee goobta ganacsiga ka soo gaaray xaaladda degdegga ah ee COVID-19. Haddii codsiyadu ka bataan lacagta la hayo, deyn codsadayaasha waxaa lagu xulayaa hab bakhtiyaa nasiib ah.

Shaqaalaha ayaa ganacsiyada loo ogolaado boostada warqad wargelin ah loogu dirayaa. Xafiis kale oo sadexaad oo la shaqeeya deyn bixiyaha ayaa fulinaya deynta oo gaarsiinaya lacagta. Xafiiska kale ee sadexaad waa hay'ad degaanka ah oo aan faa'iido doon aheyn oo qaabilsan horumarinta bulshada.

Codsadayaasha loo ogolaado waxaa laga doonayaa in ay hay'adda u soo gudbiyaan waxyaabaha soo socda:

• Nuqul (copy) jeeg bangi oo aan la isticmaali karin (voided) – waxaa la doonayaa in laga helo macluumaadka bangiga lacagta lagu shubayo

IYO MID KA MID AH

• Sawrika leesinka Minnesota, barashada gaariga ama Aqoonsi; ama warqadda cadeynta ee aqoonsi kale,

AMA

• Nuqul aqoonsi sawir leh, haddii aanu codsaduhu laheyn leesin Minnesota ah ama Aqoonsi.

Ma heli kartaa macluumaadkan haddii laguu ogolaado deynta?*

Haa Maya

LACAGTA WAXAA LAGU SHUBAYAA XISAABTA BANKIGA EE GANACSIGA XILLIGA SAXIIXA. MA JIRO JEEG GACANTA LA ISKA SAARAYO.

## SHURUUDAHA DEYNTA

Magaaladu waxa ay dooneysaa in ay joogteyso xiriirka ay la leedahay ganacsatada ay taageerada ugu fidineyso barnaamijkan oo ay ka caawiso sidii ay uga sookaban lahaayeen aafada dhacday. Sidoo kale ayaa dhinaca kale, ee deynta qaadanaya laga doonayaa in ay soo gudbiyaan macluumaad la xiriira isticmaalkadeynta sadexdii biloodba mar Magaalada Minneapolis. Macluumaadkaas waxaa ka mid ah laakiin aan ku koobneyn. Xaaladda ganacsiga, goobta ganacsiga, waxyaabaha la xiriira xagga sharciga ee ganacsiga soo food saara, ama baahida farsamo ee ganacsiga. Magaaladu waxa ay macluumaadkaas u adeegsaneysaa goobaha ay khuseyso. Deyn qaataha waxaa loo soo gudbinayaa goob ay internetka ka buuxin karaan oo macluumaadka ay ku soo gudbin karaan sida codsiga deynta oo kale ka hor inta aan la gaarin dhamaadka laba iyo tobanka bilood. Magaaladu waxa ay warbixinta iyo wixii kale ee dabagal ee ay sameeyaan u adeegsaneysaa in ay ku ogaato in deyn qaatuhu ka soo baxay shuruudihii looga cafin lahaa deynta. Magaaladu waxaay ka cafineysaa goobaha ganacsiga ee kahwalgala Minneapolis deynta ay qaateen marba haddii ay u hogaansameen sharciyada magaalada. Ganacsatada aan ka soo bixin shuruudaha waxaa laga doonayaa in ay dib u bixiyaan deynta ay qaateen haddii loo ogolaaday in deynta la siiyo dhamaadka laba iyo tobanka bilood.

Ma ogoshahay shuruuddan haddii laguu ogolaado in deynta lagu siiyo?*

○ Haa ○ Maya

## MACLUUMAADKA DAWEYNAHA

Magaaldu waxa ay codsaneysaa jawaabaha sadexda su'aalood ee soo socda si ay u hubiso in la raacay sharciyadda dawladda dhexe u degsan ee Sharciga U Sinaashaha Fyrsadaha Deyn Qaadashada. Magaaladu waxa ay macluumaadkaan u adeegsaneysaa in ay fahamto halka ay ka soojeedaan dadka ka qeyb qaadanaya mashruucan. Khasab kuguma aha in aad nala wadaagtomacluumaadkan. Jawaabta aad ka bixiso sadexda su'aalood ee soo socda laguma qiimeynayo in aad ka soo baxday shuruudaha ku xiran deynta, loomana adeegsanayo go'aan ka gaarista bixinta deynta. Sharciyada dawladda dhexe waxa ay mamnuucayaan in macluumaadkan loo adeegsado heyb sooc dadka lagu sameeyo, ama go'aanka aad klu gaarto in aad nala wadaagto iyo in kal. Haddii ay ku khuseyso, qaar ka mid ah macluumaadka ayaa laisu geynayaa oo lagu ururinayaa iyada oo laga tibaaxayo waxyaabaha laarko iyo magacyada dadka ee aad adigu sheegtay ama kuwa kale nala wadageen. Mulkiilekasta oo ganacsiga ku leh 20%,fadlee caddee qowmiyadiisa, halka uu ka soo jeedo iyo jinsiga uu yahay.

**Midabka Mulkiilaha 1aad***

__________

**Qowmiyadda Mulkiilaha 1aad***

__________

**Jinsiga Mulkiilaha 1aad***

__________

**Midabka Mulkiilaha 1aad***

__________

**Midabka Mulkiilaha 2aad***

**Qowmiyadda Mulkiilaha 2aad***

**Jinsiga Mulkiilaha 2aad***

**Midabka Mulkiilaha 3aad***

**Qowmiyadda Mulkiilaha 3aad***

**Jinsiga Mulkiilaha 3aad***

**Midabka Mulkiilaha 4aad***

**Qowmiyadda Mulkiilaha 4aad***

**Jinsiga Mulkiilaha 4aad***

## QIRITAANKA QARSOODI KA DHIGISTA MACLUUMAADKA:

Xogtan waxaa lagaaga codsaday si go'aan looga gaaro in aad ka soo baxday shuruudaha ku xiran gargaarka ay bixiso Waaxda Shaqaalaha iyo Horumarinta  Dhaqaalaha.  Khasab kuguma aha in aad nala wadaagto macluumaadka lagaa codsaday, laakiin haddii aadan soo gudbin waxa ay keeni kartaa in Magaaladu aysan awoodi karin in ay ogaato in aad ka soo baxday shuruudaha iyo in kale ka dibna la diido codsigaaga.  Xogta aad soo gudbisay waxaa lagu dhaqayaa sida uu dhigayo Sharciga Qarsooodi Ka Dhigista Macluumaadka ee Gobolka Minnesota, Cutubkiisa 13aad.

## CADEYNTA GANACSIGA:

Macluumaadkan iyo macluumaadka kale ee aad soo gudbisay qoraalada ku lifaaqan waa mid ujeedadiisu tahay in aad ku codsato deyn.  Codsaduhu waxaa uu qirayaa in macluumaadka ku xusan codsigan uu midka ay magaaladu go'aan kaga gaareyso ogolaashaha deynta. Magaalada waxaa ogolaasho loo siiyey in ay sameyn dabagal kasta oo ay u aragto inuu muhim yahay si loo xaqiiqijiyo sax ahaanshaha macluumaadka halkan ku xusan. Codsaduhu waxa uu magaalada sida ugu dhaqsaha badan u wargelinayaa isbedel kasta oo saameyn ku yeelan kara sax ahaanshaha macluumaadka iyo macluumaadka ku xusan qoraalada la socda codsiga.

Waxa uu codsaduhu fahamsan yahay in ay tahay fal dambiyeed inuu ka been sheego macluumaadka maaliyadeed ee ganacsiga iyadoo ujeedada tahay in loo ogolaado deynta.  Waxa uu codsaduhu caddeynayaa in uu ogsoon yahay inuu

ku mudanayo ciqaab xagga sharciga ah haddii uu ka been sheego sax ahaanshaha macluumaadka uu ku soo gudbiyey codsiga iyo qoraalada la socda ee u taagan macluumaadka Ganacsiga taariikhda hoos ku xusan, uuna yahay mid awood sharci ah u leh inuu saxiixo foomkan.

Marka aad wax kasta ku qorto sanduuqa hoose, waxa uu codsaduhu ogolaaday inuu kombiyuutarka ku saxiixo foomkan. Waxa uu codsaduhu fahamsan yahay oo ogolaaday in saxiixa ay ku saxiixaan kombiyuuutarka uu sharci ahaan u dhigmo saxiixa ay gacanta ka saxiixaan oo laga yaabo in magaaladu ay u adeegsato isku xirnaashahaas dhamaan heshiisyada codsadaha ama Ganacsiga ee la xiriira codsigan.

Magaca Qofka Awoodda Loo Siiyey Inuu Matalo Ganacsiga

Darajada Qofka Awoodda Loo Siiyey Inuu Matalo Ganacsiga

Taariikh

## QIRITAANKA QARSOODI KA DHIGISTA MACLUUMAADKA:

Xogtan waxaa lagaaga codsaday si go’aan looga gaaro in aad ka soo baxday shuruudaha ku xiran gargaarka ay bixiso Waaxda Shaqaalaha iyo Horumarinta Dhaqaalaha. Khasab kuguma aha in aad nala wadaagto macluumaadka lagaa codsaday, laakiin haddii aadan soo gudbin waxa ay keeni kartaa in Magaaladu aysan awoodi karin in ay ogaato in aad ka soo baxday shuruudaha iyo in kale ka dibna la diido codsigaaga. Xogta aad soo gudbisay waxaa lagu dhaqayaa sida uu dhigayo Sharciga Qarsooodi Ka Dhigista Macluumaadka ee Gobolka Minnesota, Cutubkiisa 13aad.